Mjölby Kommun
Maamulka waxbarashada

Taariikhda
2016-01-25

Diarienummer
UTB 2015:193

Is dhexgalka oo dugsiga xannaanada iyo dugsiga aasaasiga oo degmada Mjölby

Meherada oo dugsiga xannaanada iyo dugsiga aasaasiga oo iswiidhan waxaa lagu maamulaa baarlamaanka oo qaranka iswiidhan sharciyada ey go'aamiyeen oo sharciga dugsiga iyo manhajka waxbarashada oo dowlada sare go'aamisay.

Ujeedada meherada oo dugsiga xannaanada iyo dugsiga aasaasiga baa in carruurta iyo ardeyda helaan iyo horumar ka gaaraan aqoonta iyo qiimaha nolosha. Meherado waa iney dhammaan carruurta iyo ardeyda horumarkooda iyo waxbarasho jeceel badan ku abuurtaa. Waxbarashada waa iney u soo gudbisaa iyo ku abuurtaa xushmeynta xuquuqda binaadamka iyo qiimaha aasaasiga oo ku salisan dimuqraadiyada oo qaranka iswiidhan ku dhisanyahay.

Nolosha bi'naadamka marnaba la sharaf ridi karin, qof shaqsiga xoriyad iyo ilaalinta badbaadada qofnimada, dhammaan bi'naadamka isku qiimo lee yahiin, sinnaanta ragga iyo dumarka iyo waxtarid dadka liito iyo dhiban baa ah qiimayaasha dugsiga muujinaayo iyo soo gudbinaayo.

Maadaama wadanka iswiidhan oo noqday qaran caalami ah oo wadamo badan xiriir la leh taasna waxey shuruudaha in bulshada wadanka ey fahmaan iyo la noolaan karan qiimaha ey lee dahay dhaqamada kala duwan. Inuu qofka yaqaan dhaqankiisa iyo ka qeyb-qaato dhaqanka dhaxal ahaan naga wada dhaxeeyo qofka waxey ku badin kaalsoonida shaqsiga uu yahay oo waa in la horumariyaa, iyo awooda wax fahmida iyo ka tusaale qaadashada dadka kale xaalada ey ku noolyahiin iyo waxyaabaha ey qiimeeyaan. Dugsiga waa goob bulshada iyo dhaqamada isku la kulmaan oo taasna keeneyso fursad iyo mas'uuliyad lagu xoojinaayo awooda dhammaan dadka meeshaas ka shaqeeyo.

Dugsiga xannaanada iyo dugsiga aasaasiga waxey wadanka u yahiin goobta ugu muhiimsan markey noqoto fulinta isdhexgalka. Dugsiga xannaanada iyo dugsiga aasaasiga oo degmada Mjölby shaqo qabadkooda waa iney ka muuqato xushmeynta oo si qiimo leh xuquuqda bi'naadamka iyo qiimaha dimuqraadiyada. Taasna waxaa lagu muujin sida habka waxbarashada loo dhigi, dhaq-dhaqaaqyada kala duwan oo kamid eheen kaliya kooxda aad waxbarashada la dhigato, oo ey quseyso dhammaan ardeyda oo dhan.

Habka dugsiga

Qeybo kamid ah dugsiga xannaanada iyo dugsiga aasaasiga baa markii meherada la hirgalinaayo dhacdaa in dhaqamada kala duwan ama diinta qofka aaminsanyahay uu shaki imaado oo xeerkii lagu dhaqmi markey xisada noqoto. Tusaalooyinka hoostan ku qoran baa warka caddeeynaayo

Ciwaanka bostada
Mjölby kommun
Utbildningsförvaltningen
595 80 MJÖLBY

Ciwaanka booqashada
Stadshuset
Burensköldsvägen 11

Telefoonka
0142 - 850 00

Internetadress
www.mjolby.se

Organisationsnummer
212000-0480

markii shakii imaado oo sidii wax laga yeeli lahaa, oo kaalmeeynaayo dugsiga, ardeyga iyo waalidka mas'uulka ah.

Habka dugsiga waa in dugsiga muujiyaa iyo ardeyda u soo gudbiyaa qiimaha qaranka ku dhisanyahay sida uu dhigaayo hadefyada aqoonta oo qaranka go'aamiyay inuu ardeyga wax-barashadiisa ka gaaro.

- **Fasax oo sabab qaas**
  Dugsi maamulaha wuxuu haystaa ilaa xad fursad uu ku bixinkaro fasax oo sabab qaas ahaan darteed. Taasna micnaheeda ma'ahaan si joogto ahaan fasax ka qaadasho arrimo waxbarashada kamid ah. Fursada oo fasax qaadashada waa la nusqaaminkara haddii la qi-imeeyay iney ardeyga ku adkaandoonto inuu gaaro hadefyada aqoonta.

- **Wakhtiyad cuntada**
  Markey noqoto dugsiga sare maalinkasto waxaa laga helaa cunto qudrad laga suubiyay oo loogu talagalay dadka aanan cunin cunto hilib ku jiro. Markey noqoto dugsiga xan-naanada iyo dugsiga aasaasiga ilaa xad waa suuragal cunto qaas in laga helo.

- **Dharka labbiska iyo dugsiga**
  Go'aanka dharka ardeyga ku labbisanyahay markuu dugsiga joogo waxaa iska leh inta ugu badan ardeyga. Laakin dharka ardeyga xiranyahay lama oggola iney ardeyga ku ad-keeyaan ka qeyb-qaadashada xisada, ama eysan sabab u noqoneyn ardeyga ama ardeyda kale oo xisada ka qeyb-qaadanaayo.

- **Shaqada dugsiga gabdhaha iyo wiilasha weey isla suubinaayaan**
  Qiimaha waxbarashada dugsiga ku dhisanyahay baa ah in ardeyda ayagoo koox yar iyo koox weeyn iyo iskugu jiro gabdho iyo wiilal isla dhigtaan waxbarashada. Taasna micna-heeda waxey tahay intaa wakhtiga dugsiga lagu jiro ardeyga wuxuu ag fadhindoonaa iyo la shaqeyndoona ardeykale eysan eheen isku jinsi, markey xisadaha caadiga socdaan iyo mararka meel dalxiis loo aado, iyo goob booqasho loogu tagi iyo wixii la mid ah.

- **Ciidaha aanan kamid eheen jedwelka taarikhda oo iswiidhan**
  Waa inaa fasax soo codsatiin sida nidaamka dhigaayo. Codsiga waxaa lagu fiirin sida sharciga dugsiga dhigaayo. Fiiri qoralka Hey'adda dugsiyada oo talo bixinta "maqnaans-ho iyo fasax"["Frånvaro och ledighet"]

- **Dugsiga arrimaha diinta kiristaanka iyo wakhtiyada kale oo dhaqan ahaan la xuso**
  Waxaa ula yeednaa ciidda masiixiga, ciidda miilaadiga kiristaanka, afarta toddobaad ee ciidda masiixiga ka horeeya iyo maalinta luusiya[påsk, jul, advent och lucia].
  Haddii ardeyga iyo waalidka eysan dooneyn in ardeyga ka qeyb-qaato dabaaldaga ar-deyga wuxuu ka qeyb-qaadan xisad kale lagu dhigaayo dugsiga.

Taariikhda
2016-01-25

Diarienummer
UTB 2015:193

- **Xisada isboortiga**
  Xisada isboortiga iyo caafimaadka waa sida xisadaha kale qasab in la dhigto. Dharka la xirto xisada ciyaaraha waa sida xisadaha kale oo ardeyga baa go'aaminaayo. Laakin dharka lagu labbisanyahay ma wanaagsana iney adkeeyaan ka qeyb-qaadashada ama ardeyga halis ku keeni karo markuu ka qeyb-qaadanaayo xisada.

  In la qubeysto kadib xisada isboortiga iyo caafimaadka waa qasab. Dugsiga baa mas'uul ka ah qol qaas oo dharka lagu badasho iyo lagu qubeysto markey noqoto gabdhaha iyo wiilasha.

  Wakhtiga oo lokaalka wax laga badalidoono waa lagu dadaali doonaa in la suubiyo qolal qaas oo lagu qubeysto oo kala xiran.

  Qeyb kamid ah xisada isboortiga iyo caafimaadka waa xisada barashada dabaasha oo siduu ardeyga u gaarikaro hadefka aqoonta dabaasha fasalka 6. Maadaama xisada dabaasha lagu baranaayo goobta dabaasha oo la dhaho Lundbybadet goobtaas xeerarkooda baa lagu dhaqmi markey noqoto: dharka dabaasha ama Burkini markii la dabaalanaayo, dharka qaarkood oo lagu tababarto oo lag suubiyay Lycra oo sida dharka dharka laga hoose xirto, weey ansaxmaayaan. Inta la dabaalan ka hore waa qasab in timaha iyo jirka la iska dhaqo.

- **Xisada muusiga**
  Xisada muusiga waa sida xisadaha kale qasab in laga qeyb-qaato.

- **Salad**
  Fiiri warbixin quseyso fasax oo sabab qaas.
  Taas micnaheeda waxey tahay iney saameynin xisadaha dugsiga ka socdo oo xilliga nasashada baa la suubinkara. Haddii ey suurtagaleyso dugsiga baa idin siin meel guud oo wax lagu caabudo oo diin qaas u eheen.

- **Xisada baayoolajiga (galmada iyo isla noolaanshada)**
  Xisada baayoolajiga waa sida xisadaha kale qasab in laga qeyb-qaato.

- **Xisada wax sawirida**
  Xisada wax sawirida waa sida xisadaha kale qasab in laga qeyb-qaato.

Ciwaanka bostada	Ciwaanka booqashada	Telefoonka	Internetadress	Bankgironummer
Mjölby kommun	Stadshuset	0142 - 850 00	www.mjolby.se	791-9848
Utbildningsförvaltningen	**Burensköldsvägen 11**	**Telefax**	**e-postadress**	
595 80 MJÖLBY		0142 - 851 00		